

Somali

Xanaanada Bilowga Hore  
ah ee loogu tala galay  
qaxootida iyo dadka  
magangalyo doonka ah



## Maxay tahay sababta ay xanaanadu muhiimka u tahay?

Xanaanadu waxay gacan ka gaysataa in cauurta loo diyaariyo in ay ku guulaystaan dugsiga iyo noloshaba. Marka ay kujiraan xanaanada, caruurta waxay isticmaalaan ciyaarta ay ku baanayaan luuqadda, tirooyinka iyo nakhshadaha. Waxay sidoo kale baranayaan sida loola dhaqmo dadka kale, wax loola wadaago, loo dhegaysto loona xakameeyo shucuurtooda. Macalimiintu waxay caruurta ka caawinayaan in ay noqdaan kuwo fakaraya, hal abuur leh, kalsoonina ku qaba waxbarashada. Cilmibaaris ayaa muujisay in laba sano oo rowdada ah ay ka wanaagsan yihiin tan halka sano ah.

## Waa maxay Xanaanada Bilowga Hore ah?

Xanaanada Bilowga hore ah waxay caruurta da'doodu tahay saddexda sano ee kasoo jeeda qaxootida ama dadka magangalyo doonka ah siinaysaa waxbarashada aasaasiga ah oo bilaash ah ama raqiis ah 15 saacadood todobaadkii.

Codsiyada loogu tala galay Xanaanada Bilowga Hore ah waxaa sameeya rowdada. Deeqda Xanaanada Bilowga Hore ah waxaa si toos ah loo siiyaa rowdada.

## Canuggaygu xaq ma u leeyahay?

Canuggaagu xaq buu u leeyahay haddii canuggaaga ama adigu aad:

- haysataan ogolaanshaha qaxoontinimo ama biniaadanimu, ama
- codsanaysaan qaxoontinimo ama biniaadanimu, ama
- haysataan kaarka ImmiCard oo shaqaynaya ama dhacay.

Haddii intaasu aysan idin khusayn laakiin adiga ama canuggaagu aad ahaan jirteen qaxooti ama magangalyo doon, ama aad lahaydeen xaalado noocaas ah, wali canuggaagu xaq ayuu u yeelan karaa.

La xiriir Waaxdaada Waxbarashada deegaanka iyo xafiiska Tababarka si aad wax uga weydiiso xaaladaha gaarka ah. Waxaad sidoo kale weydiin kartaa qof kasta oo xirfad u leh kaasoo kaa caawinaya in aad Waaxda la xiriirto.





## Sideen ugu biirinayaa canuggayga?

Xanaanada Bilowga Hore ah waxaa laga heli karaa dhammaan barnaamijyada rowdada leh macalinka xirfadda u leh. Waxaad canuggaaga ugu biirin kartaa adiga oo la xiriiraya Xanaanada kuugu dhow ama Golahaaga..

Usheeg rowdada haddii aad u baahan tahay tarjumaan. Waxay isticmaali karaan adeeg tarjumaad khadka telefoonka ah oo bilaash ah.

Haddii aad u baahan tahay kaalmo dhanka ku biirinta canuggaaga xanaanada, weydii Waaxda Waxbarashada iyo Tababarada, ama xirfadle kasta oo ku taageeraya, sida:

- shaqaale dhanka taageerada ah
- shaqaale dhanka dhaqamada ah
- kalkaaliso dhanka dhimirka iyo caruurta ah
- fududeeye koox ciyaareedka la taageero.

## Ma tahay in canuggaygu aado xanaanada afar sano jirada?

Haa. Kaddib Xanaanada Bilowga Hore, canuggaagu wuxuu xaq u leeyahay rowdada afar sano jirada oo bilaash ah ama raqiis ah. Arintaani waxay ka caawinaysaa in uu awooddiisa dhiso.



## Xageen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Xanaanada Bilowga Hore?

- Booqo [education.vic.gov.au](http://education.vic.gov.au) iyo Barbaarinta Caruurta , ama
- tilifoon u dir Xafiisk gobolkaaga ee Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka.

## Xiriirka xafiiska Gobolka

Xafiiska Gobolka	Goobta
Waqooyi beri Victoria 1300 333 231	Benalla Wodonga Wangaratta Seymour Shepparton Glen Waverley
Waqooyi galbeed Victoria 1300 338 691	Bendigo Mildura Swan Hill Coburg Greensborough
Koonfur beri Victoria 1300 338 738	Moe Leongatha Warragul Sale Cheltenham Frankston Dandenong
Koonfur galbeed Victoria 1300 333 232	Ararat Ballarat Geelong Horsham Warrnambool Footscray Keilor

Si lagaaga caawiyo luuqadda aad ku hadlayso:

- Wac Adeegga Tarjumaadda iyo Fasiraadda ee Qaranka(National Translating and Interpreting Service) 131 450
- weydii turjumaanka inuu waco nambarka gobolkaaga (fiiri xaga sare)
- Tarjumaanku wuxuu kujiri doonaa wicitaanka teleefoonka wuuna kuu tarjumi doonaa.

